



United Nations Educational, Scientific and Cultural Organization

## Waxbarashada Caafimaadka



Save the Children Fund (UK)



Comitato Internazionale per lo Sviluppo  
dei Popoli

## H O R D H A C

Ujeeddada Waxbarashada Caafimaadka laga leeyahay waxa weeye in la beddelo asluubta ardayda si ay u gutaan xilka caafimaadka iyo ka bulshada ay la nool yihiin.

# Waxbarashada Caafimaadka



XASAN DAAHIR OBSIYE  
Aqaasimaha Waaxda Horumarinta Manaahijta

## H O R D H A C

Buuggaan waxaa soo ururiyay,  
takuunna soo dubariday  
dawladda ee Xafiiska UNESCO  
u qabilsan tala bixinta  
waxbarashada ee Soomaaliya

Muqdisho (Somalia)

1st Reprint

## Reer - Cumar



Cumar. Cambara Maryan Aamina Safiya Cali



Kani waa qoys  
 Hooyada reerku waa Cambara  
 Carruurta waa afar; Saddex gabdhood iyo hal wiil.  
 Maryan ayaa ugu wayn, Aamina ayaa ku xigta, Safiya  
 ayaa ku sii xigta, Cali ayaa ugu yar.

**Ilmo Cumar**



**Maryan waa xaas.**



**Aamina waa kaali**



**Safiya waa jaamiciyad.**



**Cali waa arday.**

**Layli :**

**Dhammaystir weertan :**


**Kabku waxa uu ..... lafta jaban.**

**(jabiyaa, dhaawacaa, taageeraa)**


**Meheradda Cumar**



**Kani waa dukaankii Cumar.  
Waxaa la yiraahdaa suuqyare.  
Waxaa lagu iibiyaa waxyaabo badan.  
Hooyo Cambara ayaa la caawisa.**




Cali Saaxiibkii




Cali waxaa uu leeyahay saaxiib.  
 Magaciisu waa Maxamuud.  
 Maxamuud reerkoodu waa ay badan yihiin.

Layli :  
 Magacaygu waa .....  
 Saaxiibkay rumaadna waa .....

S H I L



"Fiiri dabagaallahaas"



"Ina keen aan soo qabane"




"Alla !! Lugtaydii" ayuu Maxamuud yiri.



Layli :  
 U qor si sax ah weerahan :  
 Socde, muddo, ma, qodaxi, qunyar.



### Qaybtii labaad



*Cali wax uu taagerayaa Maxamuud  
Maxamuud xanuun ba haya*

*Maxamuud Aamina ayaa kabaysa.  
"Markasta waa aad dhaawacmaysaa"  
ayaa ay tiri Maxamuud hooyadii.*



### SHIL


*Shilku waxa uu ka dhici karaa*



*Guriga*



*Dugsiga*




*Meelaha lagu ciyaaro.*

**Layli :**

*Koox ahaan u taxa shilalka ka dhici kara guriga, dug-  
siga iyo meelaha lagu ciyaaro.*

## IMMISA



"Iska waran Maxamuud"

"Nabad, Cali"

"Immisa waxyaabood oo keeni kara shil  
ayaa kaaga muuqda sawirkaan ?

"Waxaa iiga muuqda .....

Layli :

Qor dhammaan waxa sabab kara shil ?

## JILID



Jiliddu waa fiicantahay.


Waa aad ku jili kartaa fasalka dhexdiisa ama  
bannaankiisa.

Waxqabad

Koox kastaa ha jisho shilal kala duwan.

4.1

### Ka hortagga shilalka




Shilku waa dhacaan.  
Waa laga hortegi karaa.  
"Ka hortagga ayaa ka 'habboon daawaynta"

Waxqabad

Ka feker shil, la falanqee kooxdaada sidii looga hortegi lahaa.

4.2

### Maxamuud waa raystay



Aamina waa kalkaaliso wanaagsan.  
Waxaa ay baaraysaa Maxamuud lugtiisa.  
Maxamuud lugta waa u raysatay.  
Waa uu faraxsan yahay.

Layli :

Qor sidii uu Maxamuud lugta uga jabay.



### Shaqada Aamina



"Sideed tahay" ayaa ay tiri hooyo.



"Waan daalanahay shaqadii ayaa igu badatay oo shilal badan baa dhacay.

"Waa in aynu isku daynaa in aan wax ka gabanno shilalka" ayaa uu yiri Aabbe.

Layli :

Immisa shil ayaa ka dhacay gurigina sannadkaan ?

### Dukaanka dhexdiisa I



Cumar waxa uu gadayaa dukaanka.

Hooyo Xaddiyo ayuu caano boore ka iibinayaa.


"Noocani ayaa ugu fiican",

ayuu Cumar yiri

"Hal koombo iga gad",

ayey tiri hooyo Xaddiyo.

## Dukaanka dhexdiisa II




Cumar waxa uu tirinayaa lacag.

“Maanta waxaan gaday caano boore badan”, ayuu yiri Cumar.

“Aabbe maad caanaha xoolaha gadid’?”

“Ma lo’ baan keeni karaa dukaanka”, ayuu Cumar ku jawaabay.

## Aqalka dhexdiisa



Aamina waxa ay akhriyeysaa buug cudurrada ka hadlaaya.


“Wax iiga sheeg cudurrada?”, ayuu Cali weydiiyay.

“Ilmuhu waxa ay shubanka ka qaadaan caanaha dhalada lagu siiyo”, ayey Aamina ku jawaabtay.

“Haddaba, miyey dadka caana booraha iska daayaan”, ayuu Cali isweydiiyay.

Cali waa uu warwarsan yahay.

## Dhibaatada Caanaha dhalada



"Kaalay aan soo coyaarnee", ayuu Cali yiri.


"Ma bixi karo. Guriga ayaan joogayaa," ayuu Maxamed ku jawaabay.

"Maxaa jira"?, ayuu Cali weydiiyay.

"Cunugga yar ayaa shubmaya", ayuu Maxamuud ku jawaabay.

"Aamina waxay tiri, caanaha dhalada ayaa keenta shubanka", ayuu Cali sheegay.

## Dukaanka dhexdiisa



Cali waxa uu ka sheekeynayaa jirradii Maxamuud walaashii.

"Waxaan u malaynayaa in caanaha dhaladu ay keentay shubanka", ayuu Cali yiri.

"Aamus, maxaad ka taqaanaa? "ayuu Cumar yiri.


"Waa inaan u tagaa oo aan caawiyaa", ayey Aamina tiri.

## Booqasho guri



Aamina waxay timid gurigii Xaddiya.  
 "Cuniggii siduu yahay?" ayey Aamina weydiisay.  
 "Hooyo, weli wuu shubmayaa", ayey Xaddiya ku  
 jawaabtay.  
 "Maxaad siisaa?" ayey Aamina weydiisay.  
 "Caana boore", ayey Xaddiya tiri.  
 "Haa, waxa shubarka keenay waa caana dha-  
 lada", ayey Aamina sheegtay.

## Jilid



Ma jili kartaa sheekadan.

Shaqa guri  
 Arday kasta ha soo qoro noocyada caana booraha  
 ee laga helo tuulada ama magaalada.

## Waxqabad

Ku qor jawaabahan midda saxda ah mæsha ku habboon.

(Jawaabo :- Cumar, Xaddiya, cuniggii, shuban, caanaha dhalada).

Su'aal

Jawaab

1. Ayaa dukaanka iibinaayay?

\_\_\_\_\_

2. Ayaa iibsaday caana booraha?

\_\_\_\_\_

3. Ayaa la siiyay caanihii?

\_\_\_\_\_

4. Maxaa ku dhacay cunuggii?


\_\_\_\_\_

5. Maxaa keena shubanka?


\_\_\_\_\_

## Waxqabad

Dib ugu noqo cashar 7.1 iyo 7.2, ka dibna samee sheeko.



## Fasaxii Safiya




Safiya waxa ay ka timid Jaamacadda, Lafaole.

waxa ay timid reerkoodii.

waa xilligii fasaxa.

“Waa inaan aqoontayda ugu adeegaa bulshada”,  
ayey Safiya go'aansatay.

## Kullankii walaalaha



“Cuniggii Xaddiya weli wuu jirran yahay”, ayuu  
Cali yiri.


“Carruurta tuulada waa la mid”, ayey Aamina  
raacisay.

“Ma xalin karnaa arrintaas?”, ayey Safiya weydiisay.

“Haa”, ayey Aamina tiri.

“Waa inaynu qorshaynaa”, ayey go'aansadeen.

### Qorshihii Safiya




“Fiiriya sawirkan”, ayey Safiya tiri.

Dhammaan waxaa loo jeestay sawirkii.

Waa sawir dhalo.

Maxaa isku-tallaab loogu kor sameeyay?

### Dooddii Isbitaalka



“Fiiriya sawirkan cusub. Miyaanu fiicnayn?” ayey haweeney weydiisay.

“Laakiin, maxaa isku-tallaab loogu kor sameeyay?” ayey Xaddiyo weydiisay.

“Waxa la innooga digayaa isticmaalka dhalada”, ayey haweeneydii ku jawaabtay.

“Waayo, anigu mid baan soo iibsadaye!”

“Waayo, sow tii la lahaa caanaha ayey wasakhda ka ilaalisa!”

“Waayo, sow tii la lahaa Xamar ayaa laga isticmaalaa!”

ayey haweenkii ku sheekeysteen.

“Aynu Aamina weydiino”, ayey haweenkii go'aansadeen.

## Waraysigii Aamina



"Cunuggaaga maxaa haya, Xaddiyo?" ayey Aamina weydiisay.

"Waxa haya shuban", ayey Xaddiyo ku jawaabtay.

"Cunuggayguna waa la mid . . . kayguna waa la mid .

. . . kayguna . . ." ayey haween ku dhawaaqeen.

"Maxaad ilmaha ku siisaan caanaha?" ayey Aamina weydiisay.



"Dhalo", ayey badankoodu ku jawaabeen.

"Ma dhaqan bay inoo tahay dhaladu?" ayey Aamina weydiisay.

"Maya", ayey dhammaan isku raaceen.

Haddaba, dhaladu ilmaha uma fiicna.

## Sheekadii suuqa



Dhammaan dadku waxa ay ka sheekeynayaan sawirka.

Suuqa dhexdiisa.

Guryaha dhexdooda.

Layli :

Maxaa ay dadku ku sheekeysanayaan?

Ka sheeke waxa uu sawirku dhigayo?



## Ambabixii Safiya



Safiya waxa ay ku noqonaysaa Jaamacadda.

Reerkooda ayaa ku leh, nabadgelyo.

“Qorshahaagii wuu hirgalay”, ayuu Cali yiri.

“Haa, laakiin ololihii weli ma dhammaan” ayey Safiya tiri.

“Hadda, waa in aynu dhiirigelinaa caanaha naaska”, ayey Aamina go'aamisay.

## Maxay naas-nuujintu u fiican tahay?

### Dhalo ku-nuujin



### Naas nuujin



1. Waa inaad caanaha iyo dhalada iibsataa
2. Waa inaad caanaha diyaarisaa.
3. Waa inaad biyaha karisaa.
4. Waa inaad dhalada nadiifisaa.
5. Waa inaad dhalada dab-ooshaa oo aad ilaalisaa.

1. Wax la iibsanayo ma jiraan.
2. Waa ay diyaarsan yihiin.
3. Wax la kariyo uma baahna.
4. Wax qalab ah looma baahna.
5. Waxaad u dhaqneysaa caadi.

## Waxqabad

## Dhaaf dhalada

Dhaladu waa dilaaga \_\_\_\_\_.


Dhaladu waxay kaaga baahan

tahay \_\_\_\_\_, laakiin, \_\_\_\_\_

uma baahna nadiifin. Haddaba, waxa

habboon in ilmaha laga \_\_\_\_\_

dhalada.



- 1) Dib u qor sheekada oo ereyadan (dhaaf, ilmaha, naasku, nadiifin) ku buuxi meelaha bannaan.

---



---



---




---



---

## Werwerkii Cumar






"Maxaad la fekeraysaa", ayey Canbara wediisay.  
 "Caana boorihii ayaa la iibsan waayey, waxana ugu wacan Aamina", ayuu Cumar ugu jawaabay.  
 "Laakiin, anigu waxaan dareemayaa caafimaadka ilmaha", ayey Aamina tiri.  
 "Taasi waa shaqadaada", ayuu Cumar yiri.  
 "Sow quraankeenu ma sheegayo in ilmaha la nuujiyo", ayey Aamina caddeysay.

## Shaxankii Aamina



Aamina waxa ay diyaarinaysaa shaxan.

Kani waa shaxankii Aamina.

Da'da ilmaha	Cuntada habboon
0-4 bilood 	Caanaha naaska ayaa muhiim ah
5-12 bilood 	Caanaha naaska +cunto jilicsan (sida mushaari)
13-24 bilood 	Caanaha naaska +cuntada caadiga

## Waxqabad

Isku beeg qofka iyo hawsha uu hore u qabtay.



Safiya,



Maxamuud




Cali,



Aamina,



## Kulankii wiilasha



“Sidee ayuu yahay cunuggii?” ayuu Cali weyddiiyey.

“Waa uu roon yahay hadda”, ayuu Maxamuud ku jawaabay.

“Waxaan ka xumahay dhimashada carruurta ee faraha badan”, ayuu Cali yiri.

“Oo maxaa u sabab ah?” ayuu Maxamuud weyddiiyey.

“Ma garanayo ee aynu Aamina weydiino”, ayuu Cali yiri.

## Aamina iyo Wiilashii



“Habeen wanaagsan Aamina. Ma mashquul baad tahay?” ayuu Cali weyddiiyey.


“Waan daalanahay..... jirro badan..... dhimasho badan”, ayey Aamina ku jawaabtay.

“Maxay carruur badani ku dhintaan?” ayuu Maxamuud weyddiiyey.


“Waa waqti dambe. Berri ayaan idin tusi doonaa sawirro”, ayey Aamina raacisay.

### Isbitaalka dhexdiisa


*Fiiriya sawirradan.*



Haddii aynu ka hortagno cudurradan, dhimashada carruurta waa yaraanaysaa.




### Furitaanka dugsiga



“Soo noqod wanaagsan ardayey”, ayuu Macallinkii yiri.  
 “Kumaa haya arrin xiisa leh oo uu la kulmay?,” ayuu raaciyey.  
 Cali ayaa istaagay.  
 “Waxaan maqlay cudurada dilaaga ah”, ayuu Cali yiri.  
 “Ma jiraa qof yaqaana cudurada dilaaga ah?,” ayuu Macallinkii weyddiiyey.  
 “Maya . . . Maya . . .”, ayey ardaydii ku jawaabeen.  
 “Anigaa keeni doona sawirrada cuduradaasi”, ayuu Cali go’aamiyey.

## Sawirradii Aamina



Dabayl,

Macallinku waxa uu ku tashaday inuu isticmaalo  
Sawirrada Aamina.


Fiiriya sawirkan.

"Maxaa ku dhacay cunuggan", ayuu Macallinkii  
weydiyey.

"Iug baa gaaban", ayey ardaydii ku jawaabtay.

"Cudurkani waxa la yiraahdaa Dabayl" ayuu macal-  
linkii tilmaamay.

## Doodii fasalka



Astaamaha dabaysha

1. Xummad
2. Lug ayaa naafowda,  
mararka qaarkoodna  
lug iyo gacan.

"Maxaa keena dabaysha?" ayuu macallinkii  
weydiyey.


"Dabayl baa martay", ayey ardaydii ku jawaabeen.

"Ma aha sidaas", ayuu macallinkii yiri.

Dabayshu waa cudur.

Fiiri astaamaha Cudurka dabaysha.

## Macallinkii iyo Cali




"Sawirrada jirroyinku waa ku habboon yihiin dug-siga", ayuu Macallinkii yiri.

"Laakiin saaxiibkay Maxamuud kama soo qaybgeli akro", ayuu Cali Caddeeyey.

"Haddaba, aynu qorsheyno siday dad badani uga faa'iideysan lahaayeen", ayuu macallinkii tilmaamay.

Cali ayaa ka waramay qorshihii Safiya ee dhalada.

## Soo-noqodkii Safiya



Safiya waa ay soo noqotay.


Cali waxa uu uga waramay Cudurrada dilaaga ah.

"Bal ka feker qorshe habboon?" ayuu Cali weyddiiyey.

"Waxaynu isticmaali Sawirrada Aamina", ayey Safiya ku jawaabtay.

"Sidee?" ayuu Cali weyddiiyey.

## Qorshe Safiya



“Waxaynu diyaarin ciyaar”, ayey Safiya tiri.


“Sax, sideynu u ciyaari doonaa?” ayuu Cali weyddiiyey.

Waxa ay ciyaarto ka kooban tahay laba urur oo kaarar ah.

Urur 1

Urur 2

“Macallinka iyo ardaydu ha inaga caawiyaan”, ayey go'aansadeen.



Macallinkii ayaa ka caawinaya qorshihii.

Ardaydii ayaa ka caawinaysa qorshihii.

Marka hore, magaca cudurrada waa in la bartaa.

Dabeyl, Jadeeco, Qaaxo, Xiiqdheer, Gawracato, Kojiye.



## Astaamaha Cudurrada

Haddana waa in aan barannaa astaamaha cudur kasta.

Jadeeco




Astaan

Qufac

qandho

Furuuruc



Astaanta ay wadaagaan cudurrada badanaa waa



Layli:

Tax cudurrada aan qandhada lahayn?

## Astaamaha kale



Isku beeg magaca iyo cudurka.

Ma taqaannaa cudurrada dilaaga ah?



Dabayl



Jadeeco



Xiiqdheer



Qaaxo



Gowracato



Kojiso

Waxqabad

Ma taqaannaa astaamaha cudurrada dilaaga ah?


Dabeyl,

Xiiqdheer,


Jadeeco,

_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____

Astaamaha Cudurrada



## Xeerarka Ciyaarta



Maxaa loo baahan yahay

- 1) Lixda sawir ee cudurrada dilaaga ah.
- 2) Astaamahooda.

Dadka ciyaari kara

2, 3, ama 6 ciyaartoy


Sida loo ciyaaro

- 1) U qaybi sawirrada ciyaartoyda
- 2) Kaararka astaamaha ha lagu rogo miiska dushiisa ama dhulka.
- 3) Ciyaartoyga ugu horreeya ha doorto hal kaar oo astaan ah, haddii uu tilmaamayo kaarka cudurka uu haysto, ha ceshado. Haddii uusan tilmaamayn ha iskaga celiyo miiskiisa.

Ciyaartoyda kale sidaas ha ku wadeen.

Ciyaartoyga ugu hormarsada kaararka astaamaha ayaa ugu hor badinaaya.

## Ciyaarta




Faadumo waxa ay qaybisay lixdii cudur. "Qofna yuu fiirin astaamaha", ayey raacisay!

Arday: "Aniga waxaan helay astaan ah Furuurac". Waa Jadeeco". ayey yiraahdeen ardaydii kale.

"Qufac ayaan helay", ayuu Cali yiri. Waa Dabayl. Maya! ayay ku jawaabeen ardaydii ku celi meeshiisa, Qufac ma leh dabayshuye.

Qof kastaa waa uu ka helay ciyaarta.

### Ciyaartii iyo Xaafadda




Cali waxa uu la ciyaarayaa Maxamuud.  
Maxamuud hooyadii iyo walaali waa ay jeclaysteen  
ciyaarta  
"Ciyaarta waa fiicantahay", ayey raacisay hooyo  
Xaddiya.  
"Haa, hooyo marka aan si fiican u soo barto ayaan la  
ciyaari doonaa walaalahay", ayuu Maxamuud yiri.

### Ciyaarta iyo Xarumaha Dhallaanka iyo Hooyada




"Aamina, cuna bararku ma astaan dabayl baa?"  
ayey weydiisay Caasha.  
"Maya, cuna bararka waxaa leh gowracatada ayey  
ku jawaabtay Isniino.  
"Waa sax", ayey Aamina tiri.  
Alla, wax badan ayaan ku baranay ciyaartaan.  
Haa, wax ka badan ayaa idiin soo socda.

## Imaatinkii Maryan



Maryan waxa ay timid qoyskoodii  
Cali waa uu faraxsan yahay.  
“Ma taqaanaa cudurrada dilaaga ah?” ayuu Cali  
weydiyey.  
“Maya ee maxay yihiin?” ayey Maryan tiri.  
Cali waxa uu tusay sawirradii.  
“Alla, waa jadeeco, dabayl . . .”, ayey Maryan tiri.  
“Illeyn waad taqaanaa”.  
“Weliba, waxaan aqaanaa sida loo daaweeyo”, ayey  
Maryan tiri.  
“Laakiin, takhtar ma tihid”, ayuu Cali yiri.

## Dooddii walaalaha




Waxa ay ka sheekeysanayaan cudurrada dilaaga ah.  
“Safiya , qof aan takhtar ahayn miyuu daawayn  
karaa cudurrada dilaaga ah”, ayuu Cali weydiyey.  
“Sidee kale, siday dadkeenu iskaga daaweyn jireen  
cudurrada?” ayey Safiya tiri.  
“Ama ay hadda isku daaweeyaan dadkeena xoolaha  
dhaqda”, ayey Aamina raacisay.

Layli :

Soo warayso waalidkaa sidii dhaqan ahaan loo  
daaweyn jiray cudurrada.

## Fasalka dhexdiisa



Fasalku waxa uu ka dooday cudurrada dilaaga ah.  
 "Sidee ayaa ay dadku u daweyn jireen cudurrada?"  
 ayuu Macallinku weydiiyey.  
 "Way Alla baryi jireen", ayey ardaysii ku jawaabeen.  
 "Waxay cuni jireen geedo iyo dhir".  
 "Haddaba aynu soo baadhno wixii lagu daaweyn  
 jiray jadeecada", ayuu Macallinkii yiri.

Layli :

Buuxi meelaha bannaan:

1. Maanta waxay dadku tagaan \_\_\_\_\_.
2. Beeryihii hore waxay dadku isticmaali jireen .

## Waraysigii Sheekha



Maxamuud iyo Cali waxay tageen dugsi Quraanka.  
 "Maxaad haysaan maanta?" ayuu Sheekhii  
 weydiiyey.  
 "Sawir qof qaaxo qaba", ayuu Cali yiri.  
 "Markaan yaraa ayey igu dhacday", ayuu Shekhii  
 yiri.  
 "Maxaad sameysay?" ayuu weydiiyey.  
 "Waxa la i siiyay hilib, caano iyo haruur", ayuu  
 Shekhii yiri.

## Safiya iyo Cali



Cali waxa uu uga warramay Sheekhii.

"Taasi miyey daweynsaa qaaxada?", ayuu Cali weydiiyey.

"Hilibka, Caanaha iyo haruurku waxay siiyaan qofka xoog", ayey Safiya tiri.

"Qofka qaaxada qaba waa la takoora, waayo qaaxada waa la kala qaadaa", ayey Safiya tiri.

## Isbitaalka




"Subax wanaagsan, ma filayo inaad jirran tihiin", ayey Aamina tiri.

"Ma jirranin, waxaanse haynaa su'aal", ayey Safiya tiri.

Waxa ay uga warrameen dooddii.

"Taasi way daweyn kartaa qaaxada, laakiin waa ay ku soo noqotaa qofka cunto xum awgeed", ayey Aamina tiri.




"Alla, cunugga xiiqdheer baa haysa, Xaddiya. Miyaad wax daawa ah siin?", ayey Cambara weydiisay.

"Maya, ii sheeg wax lagu daaweeyo", ayey Xaddiya ku jawaabtay.

"Caana dameeraad iyo hilib bakayle, wax uga roon ma arkin", ayey Cambara tiri.

"Cunugayga ayaa ku bogsooday", ayey raacisay Suubban.

## Daaweynta Xiiqdheerta



Hooyo Cambara ayaa Aamina iyo Safiya uga sheek-eysay daaweynta dhaqanka.

"Ma ku aragtay buugaagta daawo noocani ah", ayey Cambara weydiisay.

"Hooyo, daawooyinka waxa laga sameeyaa dhirta ama xayawaanka qaybo ka mid ah", ayey Safiya ku jawaabtay.

"Waa run, waxtarna way leedahay daawada dhaqanka. Hooyo, ii sheeg waan qoranayaaye", ayey Aamina raacisay.




### Booqasho Xaafad



Hooyooyinka qaar ayaan ilmaha jirran geynin isbi-taalka. Aamina waa ay ka war-qabtaa arrintaas. "Waa inaan soo ogaadaa sababaha ay u keeni waayeen", ayey ku fekertay. Waxa ay isku diyaarisay in ay booqato xaafadda. Cali ayey ku martiqaadday in uu raaco.

### Waxqabad



1. Ku dhammaystir erayadan (caano dameeraad, malab, hilib, iyo caano) meelaha bannaan.
  - b) Dhaqan ahaan Qaaxada waxaa lagu daaweyyaa \_\_\_\_\_
  - t) Daawada xiiqdheertu waa \_\_\_\_\_
2. Tax magacyada cudurrada dilaaga ah?

### Guriga Muumina



"Asalaamu Calaykum",  
"Calaykuma Salaam".

"Ka warran carruurta", ayey Aamina tiri.


"Way ladan yihiin. Laakiin, ilmahan ayaa jirranaa beryahan", ayey Muumina tiri.

"Maxaad ilmaha ugu haysaa guriga oo aad u keeni weydey?", ayey Aamina weydiisay.

"Sheekh ayaan u geeyey oo qur'aan ku akhriyey, geedana waa la siiyey", ayey Muumina tiri.

"Ayaandarro, dabayshu daawo ma leh", ayey Aamina tiri.

### Ururinta daaweynta dhaqanka




"Guryo badan ayeynu maanta soo booqannay", ayuu Cali yiri.

"Haa, waanan soo qoray daaweynta dhaqanka ee ay dadku isticmaalaan", ayey Aamina tiri.

"Oo ma habboon tahay?" ayuu weydiyey.

"Takhtarradu waxa ay geedaha qaarkood ka sameeyaan daawo", ayey tiri.

## Qaniinyadii Kaneecada



Maxamuud iyo Cali waxay u baxeen socod.


Waxay arkeen meel biyo fadhiyaan.

Cali waxa qaniintay kaneeco.

"Halkee ayey kaneecadu ka timaadaa?" ayuu Maxamuud weydiiyey.

"Aynu Safiya weydiino," ayuu Cali yiri.

## Halkey Kaneecadu ka dhalataa?




Maxamuud iyo Cali ayaa u yimid Safiya.

"Kaneecadu waxay ka dhalataa biyaha," ayey Safiya tiri.

"Maan filayn sidaas," ayuu Cali yiri.

## Waxqabad



*Ku buuxi erayadan (fadhiyaan, qaniintaa, dhalataa) meelaha banaan,*

1. Kaneecadu waa ay \_\_\_\_\_ dadka.
2. Kaneecada waxa ay ka \_\_\_\_\_ meelaha ay biyuhu \_\_\_\_\_.

## Jirradii Cali



*“Xummad baa ilaa galabta haysay”, ayey Cambaro u sheegtay.*

*“Waxaan filayaa in ay tahay duumo”, ayey Aamino tiri.*

*“Duumo waa cudur ay kaneecadu keento.*

*Waxaan siin daawo”, ayey Aamino go’aamisay.*

## Booqashadii Maxamuud



"Iska waran Cali, sidee laguu hayaa," ayuu weydiiyey.


"Waxa i heshay duumo", ayuu Cali ku jawaabay.

"Maxay duumo tahay?" ayuu Maxamuud weydiiyey.

"Kaneecada ayaa keenta" ayuu Cali ku jawaabay.

"Allaha ku caafiyo, Nabadgelyo," ayuu yiri.

## Fasalka dhexdiisa



"Cali, maxaad ku maqnayd?"

ayuu Macallinkii weydiiyey.


"Waxa i heshay duumo," ayuu ku jawaabay.

"Macallin, waa maxay duumadu," ayey ardaydii weydiisay.

"Berri ayeynu samayn doonaa tijaabo," ayuu go'aamiyey.

24.1

## Tijaabadii



"Tijaabadani waxay tilmaamaysaa

meesha ay

kanecadu ka dhalato," ayuu yiri.

Soo qaado koombó.

Biyo ku shub.

Dhig meel hadh (hoos) leh.

Layli

Tijaabadan ku samee fasalka iyo guriga.

24.2

## Wada-tashi



"Beryahan waxa badatay kanecadii," ayey Aamina tilmaantay.

"Sidoo kale waxa bata dulintii," ayey Safiya ku jawaabtay.

Kaneco, duqsi, kutaan, injir, baranbaro.

"Dhammaan waa la dabargoynta karaa," ayey isla garteen.

## Waxqabad

Soo baadh meelaha ay ku badan yihiin ee magaal-  
adiina, xaafaddiina.

## Waxqabad

## B. Isku beeg magacdan iyo sawirrada



Kaneeco




duqsi



kutaan



Injir



baranbaro

T Ku buuxi xarfaha habboon meelaha bannaan.


b) k\_n\_c\_

j) D\_qs\_

t) B\_r\_nb\_r\_

x) \_nj\_r\_

## Gebagebadii Tijaabada



"Fiiriya koombada. Maxaad ku aragtaan," ayuu Macallinku weydiiyey.

"Cayayaan dhex dabaalanaya biyaha," ayay ku jawaabeen.


"Haddii ay kaneeco yihiin waa dilayaa, waayo waxa ay keentaa duumo," ayuu Cali yiri.

"Waa kaneeco yaryar. Sida loo dabargooyana berri ayeynu ka tashan," ayuu go'aamiyey.

Layli

Sidee loo dabargoyn karaa kaneecada?

## Dabargoynta Kaneecada




Waxa laga doodayaa sida loo dabargoynta lahaa kaneecada. Waxa lagu dabargoynta karaa sidan:-

- In la aaso godadka ay biyuhu fadhiistaan.
- In la gaabiyo cawska.

“Haddaba, aynu bilowno hawsha,” ayuu go’aamiyey.

Arday kasta waa u shaqeynayaa.

## Qorsheyntii Ololaha



Waxa uu macallinkii uga sheekeeyay hawshii ay ardaydu qabatay.


“Sidoo kale, aynu olole ku qaadno dhammaan dulinka,” ayey go’aansadeen.

Waxa ay diyaariyeen qorshe.

Waxa ka qaybqaadaneysa ardayda.



## Nadaafadda Guud



"Macallin, waa maxay nadaafadda guud?" ayuu arday weydiiyey.

"Nadaafaddu waa caadada wanaagsan ee uu qofku ku dhaqmo si uu u helo caafimaad," ayuu ku jawaabay.

Waxa ka mid ah:-


- Dhammaan qaybaha jirka oo la nadiifiyo.
- Degaanka oo la nadiifiyo.

"Berri waa maalintii nadaafadda jirka. Arday kasta waa inuu ku soo talagalaa," ayuu u sheegay ardaydii.

Layli

Qor qaybaha jirka ee loo baahan yahay in la nadiifiyo.

## Nadaafadda Jirka



Ardaydu waxa ay taagan yihiin safka.

Waxa ay diyaar u yihiin in laga fiiriyo nadaafadda jirka.

Macallinku waxa uu fiirinayaa nadaafadda

- Cidiyaha.
- timaha
- jirka
- dharka.

Layli

Qor sida loo daryeelo nadaafadda cidiyaha, timaha, jirka iyo dharka.

## Nadaafadda degaanka




Maanta waa ololihii nadaafadda degaanka.

Waxa ka qaybqaadanaaya arday, Macallimiin, sha-  
qaale iyo dadweyne.

Waxa ay nadaafadda degaanku waxtar u leedahay  
caafimaadka dadka.

## Maxay dadku cunaan



"Buuggani wuu fiican yahay", ayey tiri.

"Muxuu ka hadlayaa?" ayuu weyddiyey.

"Cunto. waxa uu leyahay dad badan baa cuna  
Masaska", ayey tiri.

"Cajiib".


"Haa, iyo Raha iyo Ayaxa", ayey raacisay.

Layli :

Dhammeystir weerahan

1. Waxaan jeclahay cuno \_\_\_\_\_
2. Waxa kale oo aan jeclahay \_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_, iyo \_\_\_\_\_

### Ciyaarta cuntada



"Aynu diyaarino ciyaar cunto", ayey tiri.

"Fadlan, noo sheeg, sidee?" ayuu Cali yiri.

"Marka hore, waa ineynu sameynaa kaararka siwirrada cuntada", ayey tiri.

Kuwaan oo kale, mid kasta laba kaar.

Waxqabad

Soo diyaari kaararka sawirrada cuntada.

### Ciyaaridda ciyaarta



Cali iyo Maxamuud waxa ay dhowr jeer ciyaareen ciyaarta cuntada.


"Markii aan dhowr jeer ciyaaray ayaan aad u fahmay," ayuu Maxamuud yiri.

Layli

Fiiri sawirrada, kana jawaab su'aashan.

Wiilkee kor haya sawirro aan islahayn?

## Maxay tartaa cunto?



"Hooyo maxaad samaynaysaa?, ayuu Cali weydiiyay.

"Geed baan quudinayaa".


"Quudinayda !! oo maxaa jira?"

"Eb, wuu ku korayaa".

Maxamuud ayaa isaguna hooyadii ka maqlay in uu geedku ku xoogaysto digadda xoolaha.

Cali iyo Maxamuud ayaa Aaba Cumar ka ogaaday in ay dhirtu jirrato, dhimato haddii aan la xannaanayn.

## Waraysi



"Safiya, maxay inoo tartaa cuntada", ayuu Cali weydiiyay.


"Soow kuma dheregno marka aan gaajaysannahay-", ayuu Maxamuud la soo booday.

"Sax, laakiin siyaabo kale ayaa jira maaha Safiya?", ayey Aamina tiri.

"Haa, waxaa ma loo sheegay in cuntada lagu koro, lagu caafimaado, laguna dhaqdhaqaaqo", ayey Cali iyo Maxamuud sheegeen.


"Fariid, waa sax", ayey Safiya iyo Aamina ba yiraahdeen.

## Karo, tamar, kaabo



1. Waxaan u baahannahay cuntada tamarta laga helo sida: Soorta, canjeerada iyo bariiska.
2. Cuntada lagu koro sida: Hilibka, digirta, ukunta iyo caanaha.
3. Cuntada caafimaadka kaabta sida: Mooska, karootada babayga iyo liinta.

## Baro cuntadeenna



"Weligay u ma aan aqoon in cunto intaas u qaybsanto", ayuu yiri Maxamuud.

"Waxaanse garanayaa in ay jirto cunto aan jeclaysto iyo mid aan necbahay", ayuu raaciyay.


"Hadda ma garatay sababta ay dadka qaarkood u tamardarran yihiin una caataysan yihiin", ayuu Cali weydiiyay.

"Haal, Ee Caliyow sideen ugu caawini karnaa"?, ayuu Maxamed weydiiyay.

"Waxaan filaayaa in ay Safiya naga caawiso sidii aan dadka ku gaarsiin lahayn hees na loogu dhigay fasalka kowaad", ayuu Cali soo jeediyay.

"Heesuhu waa dhaqan-dadku na waa jeclaysan doonaan", ayuu Maxamed ku dhirrigeliyay dadka

“Carruuray cuna”



“Safiya, na la qorshee sidii aan heestaan dadka ku gaarsiin lahayn”, ayuu Cali weydiiyey.

“Warqado badan ayaan ku qoraynaa, kaddibna waxaan ku dhajinaynaa dukaanka midna Aamina ayaa isbitaalka gaynaysa idinkuna saaxiiba-diina bara”.

“Qaad heesta ha la qoree”, ayuu Maxamuud ku qayliyay.


Layli :

Ku qor magacyada cuntada hadba meesha ku habboon.

Kaluun, digir, caano, ukun, muufo, canjeero, soor, bariis, bagal, yaanyo, babaay, moos.

tamarta laga helo,	lagu koro,	caafimaadka kaabta.
_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____

### Booqasho suuq



Canbara iyo carruurteeda iyo Maxamuud waxa ay booqanayaan suuqa.

"Fiiri, cuntada tamarta, tan koriimada iyo middii caafimaadka", ayey Maxamuud iyo Cali ku qayliyeen.

"Fariid, bal noo doora waxyaabo aynu qaad-anno", ayey Canbara tiri.

Layli:

Qor cuntada ay damacsan yihiin in ay qaataan qoyskaasi.

### "Ku soo noqoshadii guri"



"Xaggee isku wada raaceen maanta?", ayuu Aabbe Cumar weyddiiyey.


"Aabbe, waxaan soo iibinay cuntadii heesta tilmaamaysay", ayuu Cali ku jawaabay.

"Qaar ayaan dukaanka dhigaynaa", ayey Cambara tiri.

"<sup>i</sup>Qaarka kale na?" ayuu Cumar weyddiiyay.

"Waxayna ka sammaysanaynaa nafaqo dhellitiran", ayey Aamina ku jawaabtay.

## Nafaqo dhellitiran



"Waa maxay munaasabadanni?", ayuu Cumar weyddiiyay.

"Soo dhowow, bariiskan waa cuntada tamarta laga helo!", ayey Aamina tiri.


"Kallunkana waa cuntada lagu koro", ayey Safiya raacisay.

"Babayga iyo bagalkana waa cuntada caafimaadka kaabta", ayey Cali iyo Maxamuud ku qaybiyeen.

"Tamar, koriin, kaabid! naga aamusa, aan idinka cuntaynee", ayuu Cumar ku xanaaqay.

Reerkii waa wada qosleen.

## Noqoshadii Safiya



"Waxaan damacsanahay in aan waxbarashadayda beddelo oo aan noqdo takhtar," ayey Safiya go'aansatay.


"Sax. Waxaad nala joogi doontaa degmada oo waad na caamin doontaa," ayuu Cali la soo booday.

"Waa laga yaabaa, laakiin Aamina iyo Maryan ayaa ku filan degmada, ayey Safiya tiri.

"Waa hagaag, bal sannadka dambe aynu sugno sida uu xaal noqdo," ayey go'aansadeen.



### Dhammaadkii Sannadka




"Walleo Safiya waa fariid. Ma malayn kartid sida aan uga faa'iidaystay," ayuu Cumar sheegay.

"Waa run! Mase ogtahay, sidii aad u la dagaallami jirtay," ayey Cambaro xusuusisay.

"Haa! Haa!, Waan xusuustaa. Waxase maanta ay dadku ii haystaan takhtar. Waxaan ku iraaahdaa: Cuntadan cuna, tan ayaa shubanka u roon, ha badsanina macmacaanka. Wayna ku kalsoon yihiin waanadayda," ayuu Cumar yiri.

### Xiritaankii dugsiga



"Waxaynu soo gaarnay xiritaankii Sannad dugsiyeedka," ayuu macallinkii yiri.

Ardaydii sacab iyo farxad ayey iskula kaceen. "Sannadkan wax badan ayaad barateen. Haddaba, maxaad ka damacsan tihiin aqoontaasi aad kororsateen?" ayuu macallinkii weydiiyey. "In aan xusuusanno," ayuu arday ku jawaabay. "Aya fikrad kale haya?" ayuu macallinkii weydiiyey. Cali ayaa istaagay: "Waxaan filayaa in aan aqoontayada u isticmaalno sidii aan u kaalmayn lahayn dadkayaga tabaalaysan; gaar ahaan carruurta na la da'da ah ee aan nasiibka u yeelan in ay dugsiyada dhigtaan."

"U sacab tuma Cali, Cali waxaad noqon doontaa hoggaamiye wanaagsan," ayuu macallinkii yiri.

**Waxqabad**

Qof kasta ku hor qor magaciisa, hawsha uu qabto iyo kaalinta uu sheekada kaga jiray.



Tusaale:

Magaciisu waa Cali.

Cali waa arday.

Cali waxa uu ahaa wiilka ugu firfircoon.

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_



\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_



\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_



\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_




\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

**Waxqabad**

Cudur kasta ku hor qor magaciisa iyo astaamaha lagu garto.



Tusaale:

Kani waa jadeeco.

Astaamuhu waa:

furuuruc, qandho,

qufac.



\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_



\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

### Waxqabad

Cunto kasta ku hor qor magaceeda iyo qaybta ay ka tirsan tahay.

Tusaale:

Kani waa babaay.



Babaaygu waa cuntada caafimaadka kaabta.



\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_



\_\_\_\_\_



\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_



\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_



\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

Buggan waxa qoray

1. Sahra Jibril Cali
2. Mahdi Xasan Sugaal
3. Safia Jibriil Cabdi
4. Siraad Cabdiraxmaan Axmed
5. Saciid Cilmi Muuse
6. Xaliima Maxamed Xirsi

Sawirrada waxa u sameeyey

1. Maxamed Muse Macow "Gaana"
2. Cabdulkadir Cali Xassan "Baliile"

Garaace

1. Nuur Maxamed
2. Caasha Maxamed Cali

Waxaa kaloo mahad gaar ahaaneed leh Kooxda Farsamada ee Xafiiska UNESCO u qaabilsan talo bixinta waxbarashada Soomaaliyeed iyo habeyayaasha Buggaan daabacaadiisa labaad oo kala ah:

- |    |                             |        |
|----|-----------------------------|--------|
| 1. | SACIID AXMED XUSEEN (Baafu) | LAYOUT |
| 2. | MAXAMED CALI SH. SACIID     | "      |
| 3. | CABDULLAAHI MAXAMED GACAL   | "      |

LA TALIIYAHA:

G. RETAMAL  
UNESCO EDUCATIONAL ADVISER FOR SOMALIA



United Nations Educational, Scientific and Cultural Organization



# Waxbarashada Caafimaadka